



## **Wax kusaabsan ururada waxbarashada tobbanka ah ee dalka Iswidhan**

---

Waxaa kajira dalka Iswidhan tobban ururo waxbarasho oo kaladuwan. Waa ururo aan-dowlad kuxiriirin (NGOs) waxayna haystaan wax kabaddan 370 xubin iyo ururo ayaga raacsan heer qaran ahaan. Waa bar kulmeedka waxbarasho iyo dhaqan ee dhaca midka ugu weyn dalka Iswidhan. Dad isugu jira dhammaan da'ooyinka kaladuwan ayaa halkan u yimaada si ay si wadajir ahi wax ugu bartaan uguna hormariyaan nafsadooda.

---

Ururada waxbarashada tobbanka ah waxay leeyihiin taariikh iyo fikrado kaladuwan. Waxay si xoogan ugu xiranyihiin dhaq-dhaqaaqyada dadweynaha iyo ururada, inta baddana waxay qaban qaabiyaan wareegyo waxbarasho iyo dhacdooyin dhaqan ayaga iskaashi la ah.

Hawlaha ururada waxbarashada waa kuwo kusalaysan fikrado muhiim ah oo ah waxbarashada dadka waaweyn ee aan rasmiga ahayn: rabida wax oggaanshaha banii'aadamka, hal-abuurka iyo rabitaanka waxbarashada. Kaqayb qaadashada wareega waxbarashada waa mid iskaada ah marwalba.

Guud ahaan dalka Iswidhan – laga bilaabo magaalooyinka waaweyn illaa meelaha ay dadka yar deganyihiin/goobaha – ururada waxbarashada waxay siiyaan taageero iyo latalin ururada aan-dowlada kuxirnayn iyo shabakooyin ama kooxo kale oo aan sidaasi rasmi u ahayn. Ma ahan suurtoagal in dadka kelida ahi ay kanoqdaan xubno ururada waxbarashada.

Ururada waxbarashada ma ahan kuwo faa'iido raadis ah. Hawlaha waxaa laga maalgeliyaa dhinaca gobolka iyo kaalmooyinka ka ahaada dowlada hoose, lacagaha ay bixiyaan dadka kaqayb qaata, lacagaha mashruuca iyo waxbarida qandaraaska ah.

Halkan waxaad kaheli doontaa xiriiro kugu xira boggaga internetka ay leeyihiin ururada waxbarashada tobbanka ah:

[www.abf.se](http://www.abf.se)

[www.bilda.nu](http://www.bilda.nu)

[www.folkuniversitetet.se](http://www.folkuniversitetet.se)

[www.ibnrushd.se](http://www.ibnrushd.se)

[www.kulturens.se](http://www.kulturens.se)

[www.medborgarskolan.se](http://www.medborgarskolan.se)

[www.nbv.se](http://www.nbv.se)

[www.sensus.se](http://www.sensus.se)

[www.studieframjandet.se](http://www.studieframjandet.se)

[www.sv.se](http://www.sv.se)



## Wax kusaabsan wareegyada waxbarasho

---

Wareega waxbarasho waa koox yar oo dad ah kuwaas oo si wadajir ah wax u barta. Waxay baran karaan kudhowaadkii maado kasta oo ay jecelyihiin. Dadka kujira wareega waxbarasho waa dad isku danno ah oona doonaya in ay wax baddan kabartaan arimaha ay daneeyaan.

---

Dareenka wehelnimo iyo rabitaanka in si wadajir ah wax loo barto wuxuu dad kucaawiyaa in lasameeyo jawi saaxiibnimo leh oo kadhaca gudaha wareega waxbarasho. Dhammaan wareegyada waxbarasho waxay wadaagaan sifooyinkaan soo socda:

- Kaqayb qaadashadu marwalba waa mid iskaada ah.
- Kaqayb galayaashu waa kuwo si wax ku ool ah uga qayb qaata una raadiya aqoonta si wadajir ah.
- Qofkasta oo kujira wareega wuxuu midka kale kucaawiyaa gaarida ujeedooyinka.
- Kaqayb galayaashu waxay kuleeyihiin saameyn weyn wareega – majiraan qorshooyin koorso muhiim ah ama dhexe.

Dhammaan wareegyada waxbarashadu waxay leeyihiin hoggaamiye, qorshe loogu talagalay wax ay doonayaan in ay gaaraan iyo xaaladaha baddankooda buuggaag la akhristo. Wareega waxbarasho wuxuu leeyahay ugu yaraan seddex kullamo, laakiin inta baddan waxay sii socon doonaan muddo intaas kadheer. Baddanaa waxaa jira seddex ama tobban qof oo kaqayb qaata. Hawlaha wareega waxbarashada ee ururada waxbarashada waxaa loo qaabeyn ama habbeyn karaan qaabab kaladuwan:

- Wareegyada waxbarashada waxaa lagu xayeesiyaa buuggaagta koorsooyinka iyo bogga internetka ururada waxbarashada. Mowduucyada xiisaha baddan iyo hoggaamiyayaal aqoon leh ayaa kadhigay midaan in ay noqoto hawl aad u caansan.
- Ururada waxbarashada waxay lashaqeeyaan kumanaan waxayna ula shaqeeyaan si dhow si loo habbeeyo wareegyada.
- Inbaddan oo dadka kamid ah waxay u bilaabaan wareega waxbarashada ayaga rabbitaankooda ama doorashadooda khaaska ah. Koox dad ah kuwaas oo is garanaya ayaa go'aansan kara in ay si wada jir ahi wax isula bartaan. Ururada waxbarashadu waxay siiyaan taageero waxbarasho oo wax ku ool ah kooxdan.

Tusaalooyinka mowduucyada waa luuqado, dhaqan, fan iyo farshaxan gacmeed, caafimaad, cunto, mowduucyo bulsho, siyaasado, fikrado, tababar kombuyuutar, IT, muusig, mowduucyada jawiga iyo dabiiciga.



## **Wax kusaabsan barnaamijyada dhaqameed iyo muxaadaroooyinka**

---

Dadku waxay lasameyn karaan oona kala kulmi karaan dhaqan leh qaabab kaladuwan ururada waxbarashada. Barnaamijka dhaqameed waxaa kamid ah muxaadaroooyin, gudasho ciyaareed, xaflado, badhigyo iyo dhacdooyin dhaqameed.

---

Ururada waxbarashada waa xiriir u dhaxeeya hiwaayada dhaqanka ballaaran ee Iswidhan iyo dadweynaha. Inbaddan oo kamid ah dhaqanka lasoo bandhigo waxaa lagu sameyn doonaa wareegyada ururada waxbarashada iyo iskaashi lala galo ururo dhaqameed. Inbaddan oo kamid ah barnaamijyada dhaqameed waxay sidoo kale soo dhoweeyaan dadka xirfada leh ee sameeya dhaqanka iyo barayaal dhaqan.

Barnaamijyada dhaqameed ee ururada waxbarashada waxay soo jiitaan dad marti ah oo booqasho u yimid sannad kasta kuwaas oo kabaddan kuwo taga shineemooyinka. Inbaddan oo kamid ah magaalooyinka yar-yar iyo tuullooyinka, barnaamijka dhaqameed ee ururada waxbarashada wuxuu u yahay khad nololeed dhaqanka gudaha ah. Ururada waxbarashada ma ahan marwalba kuwo ayaga masraxa saaran ama muuqda. Baddanaa waa kuwo aan dhacdada kamuuqan oo bixiya taageerada waxbarasho, iyo maamulid wax ku ool ah.



## **Wax kusaabsan waxbarashada dadka waaweyn ee aan rasmiga ahayn**

---

Ururada waxbarashada waa qayb muhiim ah oo kamid ah waxbarashada dadka waaweyn ee aan rasmiga ahayn ee kadhacda dalka Iswidhan. Ururada waxbarashada dadka waaweyn ee aan rasmiga ahayn sidoo kale waxaa kamid ah iskuulada sare ee dadweynaha ee Iswidhan.

---

Maxay yihiin sifooyinka ugu muhiimsan ee waxbarashada dadka waaweyn ee aan rasmiga ahayn? Ayada oo ay jirto noocyada baddan ee kaladuwan ee hawlaha ah, haddana waxay wadaagaan qaar sifooyin baddan ah:

- Kaqayb galka iskaada ah

Waxbarashada dadka waaweyn ee aan rasmiga ahayn waa mid kusalaysan rabitaanka dadka ay rabaan in ay raadiyaan aqoon iyo fahan. Qaraarka looga qayb qaadanayo wareegyada waxbarashada ururada iyo barnaamijyada dhaqameed waa kuwo marwalba uu u qaato qof kasta si xur ah.

- Fursada waxbarashada ayada darteeda ah

Adigu uma baahnid in wax u baratid ujeeddo gaar ah ee kusaabsan waxbarashada dadka waaweyn ee aan rasmiga ahayn. Dad baddan waxay uga qayb qaataan kaliya waxay doonayaan in ay waxbarataan iyo danahooda shakhsiyeed. Kuwan waa dhammaan sababaha aad ugu baahantahay in aad ugu jirtid waxbarashada dadka waaweyn ee aan rasmiga ahayn.

- Waxbarashada wehelka leh

Waxbarashada dadka waaweyn ee aan rasmiga ahayn waa waxbarashada wehelka leh. Wareega waxbarashada waa aasaaska waxbarashada dadka waaweyn ee aan rasmiga ahayn. Koox yar oo ka kooban dad, kuwaas oo waxbarta, ayaa kawada hadla oona isku caawiya si ay wax u bartaan— una gaaraan ujeeddooyinka ay ayagu dejisteen.

- Xuriyad

Gudaha waxbarashada dadka waaweyn ee aan rasmiga ahayn, dadku waxay xur u

yihiiin in ay go'aansadaan waxa, sida iyo goorta ay baran doonaan. Ururada waxbarashada waa kuwo xur ah sidoo kale– waa ururo aan-dowlad kuxiriirin oo leh taariikho iyo jihooyin kaladuwan.

- Xiriir xoogan oo lala leeyahay dhaq-dhaqaaqyada dadweynaha  
Waxbarashada dadka waaweyn ee aan rasmiga ahayn iyo dhaq-dhaqaaqyada dadweynaha waa kuwo si dhow isugu xiran. Inbaddan oo kamid ah ururada waxbarashada waxay leeyihiin dhaq-dhaqaaqyo dadweyne oo ah sida xubin ahaan. Qayb weyn oo kamid ah dhammaan wareegyada iyo barnaamijyada dhaqameed waxaa loo fulliyaa ayada oo iskaashi lala yeesho ururo aan-dowlad kuxiriirin oo kale. Middaan waxay u oggolaanaysaa ururada waxbarashada in ay cayaaraan kaalin muhiim ah oo kusaabsan horumarinta iyo cusboonaysiinta bulshada rayidka ah.